

# FAAFIN RASMI AH

EE JAMHUURIYADDA DIMOORAADDIGA SOOMAALIYA

---

Sannadka 18aad

Muqdisho, 14 Okt. 1990

Lr. 1 R. 10

---

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda Dimoqraaddiga Soomaaliya

---

FAAFIN BIL SOO BAXA

---

## K O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

DASTUURKA

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADDIGA SOOMAALIYA

12 OKTOOBAR 1990

*Wakaladda Madbacadda Qaranka*

# GOGOLDHIGGA DASTUURKA

Shacbiga Soomaallyeed oo Geeska Afrika ku noolaa tan iyo inti ay taariikhda iyo libaxnimada adduunku soo jirtay, isagoo ka shidaal qaadanaya halgankiisa taxanaha ah iyo sooyaalkiisa taariikheed ee ku saleysan dimoqraadiyadda dhaqanka iyo caqiiddada Diinta Islaamka, wuxuu ku guuleystay 1960kii, xoreynta iyo mideynta laba gobol oo ka mid ahaa gobolladii gumeystuhu Soomaaliya u kala qaybiyay, halkaasoo ay ka dhalatay Jamhuuriyadda Soomaaliya oo sannadkan soddon jirsatay.

Shacbigu, osagoo ka faa'lideysanaya waayo aragnimadii uu ka helay marxaladihii ka dambeeyey gaaritaanka gobannimadiisa iyo madaxbannaanidiisa, tijaabooyinkii adkaa, noloshi qalatsaneyd, dagaalladii iyo dhibaatooyinkii dabiiciga ahaa, soona maray hoggaamin siyaasadeed iyo dhabab shaqan-dhaqaale oo kala duwan, wuxuu guddoonsaday Dastuurkan oo ku saleysan mabaadi'da iyo himilooyinka soo socda:-

- dhowrista madaxbannaanida iyo midnimada Jamhriyadda Soomaaliya iyo taageeridda aaya-ka-talinta iyo xoraynta dhulalka soomaaliyeed;
- sugiidda caddaaladda iyo sinnaanta bulsho ee dadweynaha;
- Xoojinta difaaca mideysan ee Qaran;
- Ilaalinta xasilloonida iyo degganaanta gudaha;
- horumarinta iyo daryeelka nolosha daweynaha soomaaliyeed;
- xurmaynta iyo taabbagelinta xuquuqda iyo xorrlyyaadka muwaaddinka iyo qofka iyo

- taageeridda nabadgelyada adduunka iyo wax wada qabsiga shucuubta caalamka,

Wuxuuna Ilaahay ka rajeynayaa inuu ku garab galo fulintiisa iyo aayatiinkiisa dambe.

**DASTUURKA  
QAYBTA KOOWAAD  
MABAADI GUUD  
MADAXA KOOWAAD  
NIDAAMKA DAWLADDA**

**Qod. 1aad  
(Jamhuuridda)**

1. Soomaaliya wa Jamhuuriyad madaxbannaan, dimoqraaddi ah, ku dhisan shaqo iyo caddaalad, waana qayb ka mid ah Ummadda Carabta iyo Shucuubta Afrika.
2. Awoodda oo dhan waxa leh Shacbiga, waxuuna ugu isticmaalayaa, isagoo adeegsanaya hayadihiisa masuliyada, si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda.

**Qod. 2aad  
(Calanka astaanta iyo magaalo-madaxda)**

1. Calanka Jamhururiyadda midakiisu waa Buluug furan, qaabkiisana waa laydi ay dhexda kaga taal xiddig cad oo shangees ah, madaxyo simanna leh.
2. Astaan Soomaaliya wahay ka kooban taxay gaashaan buluug ah oo leh xiddaayad dahabi ah, dhexdana ku leh xiddig shangees ah oo dheeh qalin ah leh. Gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo carbeed oo xardhan lehna shan madax oo dahabi ah oo labada geesba ku yaaliin ay kala qaaran yihiin. Hareeraha waxaa ka haya laba shabeel oo isu tasmaysan, kuna kala taagan labo waran oo isku waydraasan caaradda hoose ee gashaanka, ayna weheliyaan laba caleen-cawbaar, diilin caddina ay ku qoofalan tahay.
3. Magaalomadaxda Jamhuuriyyaddu waa Muqdisho (Xamar).

**Qod. 3aad  
(Diinta)**

1. **Diinka Islaamku waa Diinta Dawladda.**
2. **Diin aan ahayn midda Islamka laguma taalin karo dalka.**
3. **Shareecada Islamka waa saldhig muhiim ah xagga sharcidejinta.**

**Qod. 4aad**  
**(Afafka Rasmiga)**

**Afafka rasmiga ah ee Dawladdu waa Af Soomaaliga iyo Af Carabiga.**

**Qod. 5aad**  
**(Shacbiga)**

1. **Shacbiga Soomaaliyeed waa Shacbi mid ah.**
2. **Jinsiyadda Soomaaliyeed waa mid qurrah. Sharcigu ayaana xaddidaya sida lagu helaya ama lagu waayayo.**
3. **Diidmada iyo qaadista jinsiyadda laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed.**

**Qod. 6aad**  
**(Dhulka Dawladda)**

1. **Dhulka Dawladda waa muqaddas, laguma xadgudbaan, lamana qaybin karo.**
2. **Gobannimada dhulka waxay koobaysaa berriga, jasiiradaha biyaha goboleed, uurkooda hoose, hawadooda sare iyo xeebaleyda.**

**Qod. 7aa**  
**(Sinnaanta muwaaddiniinta)**

**Muwaaddiniinta oo dhan, iyagoon loo eegin lab iyo dheddig, diin, xaalad bulsho iyo dhaqaale afkaar siyaasadeed, dhalasho iyo af toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba waa u siman yihiin sharciga hortiisa.**

**Qod. 8aad**  
**(Jirataanka axsaab badan)**

1. **Dalka Jamhuuriyadda waxaa ka jiraya nidaamka axsaabta badan.**
2. **Axsaabta siyaasadeed waxay si nabadgelyo iyo dimoqraaddi ah ugu tartamayaan hogaaminta siyaasadda dalka.**

3. Axsaabta siyaasadeed, ha ahaadeen kuwa xukunka haya ama kuwa mucaaradka ah waxaa loo aqoonsan yahay tiir ka mid ah tiirarka nolosha siyaasadda iyo dimoqraaddiga ee dalka.
4. Sharci gaar ah ayaa tilmaamaya nidaamka axsaabt siyaasadeed.

**MADAAXA LABAAD**  
**SALDDHIGGA SIYAASADDA DIBADDA**

**Qod. 9aad**

(Mabda'a Aaya-ka-talinta)

Dawladdu wahay aaminsan tahay mabda'a aaya-ka-talinta ee shucuubta adduunka, waxayna si buuxda u taageeraysaa shucubta iyo dhaqdhaaqaayada gobannimodoonka oo u halgamaya xorriyaddooda.

**Qod. 10aad**

(Midowga dalalka soomaaliyeed)

Dawladda Soomaaliyeed, iyadoo ku isticmalaysa dariiq nabadeed iyo mid qaanuun, waxay taageereysaa xoraynta dalalka soomaaliyeed, waxayna soo dhawaynaysaa midowga dhamman dalalka soomaaliyeed oo ku yimaada dariid nabadeed iyo rabitaanka dadka ay khuseyso.

**Qod. 11aad.**

(Siyaasadda dhexdhexaadka iyo nabad-ku-wadanoolaanshada)

1. Jamhuuriyaddu wahay ku soconaysaa siyaasadda dhexdhexaadka ee wax ku oolka ah.
2. Waxay si buuxda u aqoonsan tahay mabda'a nabad-ku-wada-noolaanshada shucuubta adduunka.
3. waxay ka soo horjeedda in khilaafaadka caalamiga ah-lagu dhammeeyo hab dagaal.

**Qod. 12aad**

(Siyaasadda wax-wada-qabsiga)

Dawladdu waxay horumarinaysa siyaasadda wax-wada-qabsiga shucuubta iyo dawladaha adduunka eek u dhisan kala faa iideysiga, sinnaanta iyo xurmaynta gobannimada iyo habka siyaasadeed ee qolo kasta u gaarka ah.

**Qod. 13aad**

**(Jamhuuriyadda iyo xiriirka caalamiga)**

**Qaanuunka Dawliga ah ee guud ahaan la aqoonsan yahay iyo heshiisyada calamiga oo Jamhuuriyaddu dhinac ka tahay, loona meelmariyey si waafaqsan sharciga, waxay ku yeelanayaan dalka awood sharci.**

**Qod. 14aad  
(Xuquuqda aadanaha)**

**Dawladdu waxay aqoonsan tahay Baaqa Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha ee Ummadaha Midoobay oo la guddoonsaday 10kii Disembar 1948kii.**

**QAYTA LABAAD  
XUQUUQDA, XORRIYAAKDA IYO WAAJIBAADKA  
ASAASIGA AH EE MUWAADDINKA IYO QOFKA  
MADAXA KOWAAD  
XUQUUQDA ASSASIGA AH EE MUWAADDINKA**

**Qod. 15aad.  
(Xaqa doorashada)**

- 1. Muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha sharciga tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto, lana doorto.**
- 2. Codka doorashadu waa shakhsi, xor, qarsoodi waana loo siman yahay.**

**Qod. 16aad.  
(Xaqa gelidda shaqada Dawladda)**

**Muwaddiniinta buuxisa shuruudaha sharciga tilmamayo, waxay xaq u leeyihiin in ay galaan shaqada Dawladda iyagoo u siman.**

**Qod. 17aad  
(Xaqa degidda iyo socodka)**

- 1. Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dego, uguna socdo si xoh ah meel kasta oo Dalka ka mid ah, lamana masaafurin karo.**
- 2. Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dalka ka bixi karo soo noqon karo.**

**Qod. 18aad.  
(Xaqa abuurdda axsaad siyaasi ah)**

1. **Muwaaddiniintu waxay xaq u leeyihiin in ay ku kulmaan axsaab siyaasadeed si waafaqsan sharciga.**
2. **Waxaa reebban Xisbi kadoo siyaasadeed o qarssodi ah, ama qaab ciidan leh ama doonaya inuu dagaal hubaysan xukunka ku qabsaday ama leh magac qabiil.**

**Qod. 19aad.**  
**(Xaqa shaqo-joojinta)**

**Muwaaddiniintu waxay xaq u leeyihiin in ay abuuraan ururro shaqaale, si ay u ilaaliyaan danahooda dhaqaale, waxayna yeelanayaan shakhsiyad qaanuuni ah.**

**Qod. 20aad**  
**(Xaqa shaqo-joojinta)**

**Xaga shaqo-joojinta waa la aqoosan yahay, waxaana loogu isticmaalayaa xuduudda sharcigu u jideeyey. Waxaa reebban fal kasta oo ku dhisan kala soocid lagu ciriirinayo xaqa xorriyadda ururrada shaqaalaha.**

**Qod. 21aad**  
**(Xaqa abuuridda ururro bulsho)**

1. **Muwaaddiniintu waxay xaq u leeyihiin in ay si madax bannaan u abuuraan ururro bulsho.**
2. **Qofna laguma khasbi karo inuu ka mid noqdo ama ku negaado urur bulsho, nooc kasta ha ahaadee.**
3. **Waxaa reebban urur bulshadeed oo qarsoodi ah ama leh qaab ciidan ama ciidan-u-yaal.**

**Qod 22aad**  
**(Xorriyadda bannaanbaxa iyo ra'yiga)**

1. **Muwaaddin kasta wuxu xaq u leeyahay inuu abaabulo, kana qayb galo kulan ama bannaanbax.**
2. **Wuxuu kaloo muwaaddinku xaq u leeyahay inuu ra'yigiisa ku bandhigo hadal, qoraal iyo qaab kasta oo kale, faaf-reeb la'aan.**
3. **Ku-isticmaalka xuquuqda ku qoran qodobkan waa inuusan ka hor imaan shuruucda ilaalisa anshaxa guud ama xasiloonida dalka.**

**Qod. 23aad**

(Xorriyadda saxaafadda)

Dawladdu waxay kafaala-qaadaysaa xorriyadda saxafadda, daabacaadda iyo faafinta, waxayna ku nidaaminaysaa sharci gaar ah.

**MAXADA LABAAD  
XUQUUQDA ASSASIGA AH EE QOFKA**

**Qod. 24aad  
(Xaqa nolosha iyo nabadgelyada qofka)**

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay nolosha iyo nabadgelinta qofnimadiisa.
2. Waxaa ciqaab dil ah lagu mutaysan karaa oo keli ah dembiyada ugu culus ee lid ku ah nafta aadanaha ama shakhsiyadda Dawladda.

**Qod. 25aad  
(Xorriyadda qofnimo)**

1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah.
2. Qofna lama xiri karo, xorriyaddiisa qofnimana ciriiri lama gelin karo, haddii aan loogu imaan isagoo dembi faraha kula jira ama aan lagu qaban ama ka soo baxay hay'adaha garsoorka ee awoodda sharciyeed u leh
3. Xaaladaha degdegga ee lagama maarmaanka ah ee sharcigu sida cad u tilmaamay qofkii tuhun dembi awgiis loo qabto ama xorriyaddiisa shakhsi ciriiri loo geliyo, waa in 48 saacadood gudahood lagu ogeysiiyo hay'adda garsoorka ee awoodda u leh lagana ansaxiyo tallaabada la qaaday muddada Sharcigu tilmaamay gudaheed.
4. Qof kasta oo xorriyadda shakhsiga ah laga qaado waa in isla markiiba la Ogeysiiyaa dembiga lagu tuhunsan yahay.
5. Qofna laguma qaadi karo tallabo nabadgelyo oo ka baxsan kuwa sharcigu tilmaamay. Tallaabada nabadgelyo waxaa go'aan sababaysan ku soo saaraysa hay'adda awoodda u leh.
6. Qofna shakhsi ahaan looma baari karo marka laga reebo xaaladaha ku tilmaaman faqrada 2aad iyo 3aad ee qodobkan iyo xaladaha kale ee sharciga ku xaddidan oo la xiriira arrimo garsoor, caafimaad ama canshuur, iyadoo mar kasta la raacayo habka sharcigu tilmaamayo, lana dhowrayo sharafta iyo xurimada qofka.



**Qod. 26aad**  
**(Nabadgelinta qofka xorriyadda**  
**Shakhsiga ah laga qaado)**

1. Qofka xorriyadda shakhsiga ah laga qaado looma geysan karo waxyeello jirkiisa ama nafsiyaddiisa.
2. Ciqaabta jirku waa mamnuuc.
3. Ku-xadgudub kasta ee loo geysto jirka ama nafsiyadda qofka xiran waa dembi, waxaana lagu mutaysanayaa ciqaab.
4. Qofka xorriyadda shakhsiga ah laga qaado waa la'arki karaa cheladiisa iyo qareen kiisa mar kasta oo uu isagu weydiisto ama iyagu weydiistaan.

**Qod. 27aad**  
**(Lahaanshaha gaar ahaaneed)**

1. Lahaanshaha gaar ahaaneed waa la dammaanad qaadayaa, sharciga ayaana xaddidaya dariiqadda lagu kasbi karo ama lagu waayi karo, nuxurkiisa iyo xuduudda isticmaalkiisa si loo ilaaliyo doorka bulshadeed ee uu leeyahay.
2. Lahaanshaha gaar ahaaneed waxaa lagula wareegi karaa dan guud awgeed, iyadoo qofki lahaaa la siinayo cawilcelin munaasib iyo degdeg ah.
3. Sharciga ayaa xaddidaya waxyaabaha geli kara danta guud ee keeni kara la-wareegidda hantida gaar ahaaneed.
4. Marka danta la-wareegidda keentay laga maarmo, hantida lala wareegay waxaa loo celinayaa qofki lahaa.

**Qod. 28aad**  
**(Xurmada hoyga)**

**Qofna gurigiisa ama meeshii kale ee isaga u gaar ah lama geli karo, haddii aysan jirin xaaladaha ku xusan faqrada 2aad, 3aad iyo 5aad ee qodobka 25aad.**

**Qod. 29aad**  
**(Xorriyadda isgaarsiinta)**

**Qarsoodiga warqadaha iyo waxyaabaha kale ee war-isgaarsiinta la xiriira lama faragelin karo, marka laga reebo xaaladaha sharcigu tilmaamayo.**

**Qod. 30aad**  
**(Xorriyadda diinta)**

**Qof kasta wuxuu xaq u leyahay inuu rumeeyso diinta ama caqiiddadii kale ee uu aammissan yahay.**

**Qod. 31aad**  
**(Xaqa dacwadda iyo is-difaaca)**

- 1. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad sharciga waafaqsan ka furto maxkamadaha awoodda u leh.**
- 2. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahey inuu iska difaaco dacwadda uu danaynayo, heer iyo darajo kasta oo ay taagan tahay.**
- 3. Xaaladaha sharciga tilmaamay o Dawladda waxay kafaalo-qaadaysaa inay bixiso difaaq lacag la'aan ah.**

**Qod. 32aad**  
**(Ka-cabashada go'aannada maamulka iyo xaqa magdhawga)**

- 1. Go'aannada hay'adaha mamulka Dawladdu waxaa cabasho looga qaadanaya maxkamadaha, sharciga ayaana sheegaya sida loo qaadanayo iyo raadka ka dhalanaya.**
- 2. Qof kasta oo dhibaato xuquuqdiisa xadgudub ku ah ay ka soo gaarto hawlwadeennada iyo shaqaalaha Dawladda ama hay'adaheeda iyagoo gudanaya xilalkooda, wuxuu Dawladda ama hay'adda ay arrintu khuseyso ku yeelanayaa magdhaw.**
- 3. Mas'uuliyadda ciqaabeed, madani iyo maamul ee hawlwadeenada iyo shaqalaha Dawladda oo la xiriirta xadgudubka ku xusan faqradda hore, sharciga ayaa nidaaminaya.**

**Qod 33 aad**  
**(Mas'uuliyadda ciqaabta)**

- 1. Mas'uuliyadda ciqaabtu waa shakhsi**

2. Eedeysanuhu wuxuu la mid yahay qof aan dembi galin ilaa maxkamadi si kama dambeys ah ugu caddayso dembiga loo haysto.

**Qod. 34aad**  
(Dib-u-nogosho la'aanta sharciga ciqaabta)

Qofna looma ciqaaba karo fal markii uu ku kacay sharcigu dembi uusan u aqoonsanayn, sida aan loogu xukumi Karin ciqaab aan sharciga ku xusnayn.

**Qod. 35aad**  
(Isu –celinta eedeysanaha ama dembillaha)

1. Waxaa dib loo celin karaa gof dembi ka soo galay dalkiisa ama dal kale ku soo cararay dalka soomaaliyeed, haddii uu jiro heshiis dhex maray. Dawladda Soomaaliyeed iyo tan soo weydiisatay celinta eedaynaha ama dembiilaha. Isu celinta eedaynaha ama dembiiluhu ma saameyn karto demdiyada siyaasadeed.
2. Dawladdu waxay siin kartaa xaq magangelyo siyaasadeed qofki uga soo carara dalkiisa ama dal kale cadaadin siyaasadeed awgeed, isagoo u halgamaya daryeelka danaha shacbiga, xuquuqda aadanaha ama nabadda.

**MADAXA SADDEXAAD**  
**WAAJIBAADKA MUWAADDINKA IYO**  
**QOFKA**

**Qod. 36aad.**  
(Ilaalinta hantida guud)

Muwaaddin kasta waxaa waajib ku ah ilaalinta iyo xoojinta hantida guud.

**Qod. 37aad**  
(Difaaca dalka)

1. Difaaca dalka, dhawrida iyo adkaynta midnimada Shacbiga Soomaaliyeed iyo xafidaada sirta. Dawladda waa waajib muqaddas ah oo saran muwaaddin kasta.
2. Shaqada difaaca qaranku waa khasab, sharciga ayaana nidaaminaya.

**Qod. 38aad**

**(Waajibka conshuur-bixinta)**

- 1. Qof kasta waa inuu bixiyaa canshuurta ku waajibtay si waafaqsan sharciga.**
- 2. Sharcigu wuxuu jidaynayaa nidaamka canshuuraha oo ay wajib tahay inuu ku salaysnaado mabaadi'da caddaaladda ijtimaaciga.**

**Qod. 39aad.**

**(Dhawsirta Dastuurka iyo Shuruucda)**

**Qof kasta waxaa waajib ku ah inuu si daacad ah u dhawro. Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.**

**QAYBTA SADDEXAAD  
SALDHIGGA DHAQAN-DHAQAALA**

**MADAXA KOOWAAD  
DHAQAALAHA**

**Qod. 40aad**

**(Horumarinta dhaqaalaha)**

**Dawladdu waxay dejinaysaa siyaasada guud ee dhaqaalaha dalka oo ku qotonta iskaashga hantida guud iyo hantida gaar ahaaneed, si loo xaqiijiyo kobcinta wax soo saarka, sare-u-qaadidda heerka maciishadda, abuuridda fursado shaqo iyo guud ahaan horumarinta dhaqaalaha dalka.**

**Qod 41aad.**

**(Lahaanshaha khayraadka dabiiciga)**

- 1. Khayraadka dabiiciga ah ee dhulka uurkiisa ku jira ama dushiisa laga helo ama biyaha goboleed, waa hanti dawladeed, sida ugu habboon oo looga faa 'iidaysanayana sharciga ayaa tilmaamaya.**
- 2. Dawladdu waxay mudnaan gaar ah siinaysaa bedbaadada bay'adda.**

**Qod. 42aad**

**(Iskaashiga Dadweynaha)**

**Dawladdu waxay dhirrigelinaysaa, si joogta ahna u xoojinaysaa, iskaashi kasta oo bulsho oo dadweynuhu iska leeyahay abaabulkiisa iyo maamulkiisa, gaar ahaan iskaashatooyinka iyo iskaa wax u qabso; iyadoo u arkaysa cududaha midaysan iyo iskaashiga dadweynuhu in ay kaalin weyn ka qaadanayaan horumarka dalka.**

**Qod. 43aad**

**(Hal-abuurka dhaqaale)**

**Hal-abuurka dhaqaalee ee gaarka ahi waa xor.  
Dawladduna waa dhiirrigelnaysaa.**

**Qod.44aad  
(Maalgelinta dibedda)**

**Dawladdu waxay soo dhawaynaysaa, dammaanad qaadaysaana maalgelinta shisheeye ee dalka gudihisa, iyadoo lagu nidaaminayo sharciyo u gaar ah.**

**MADAXA LABAAD  
HORUMARINTA WAXBARASHADA CILMIGA IYO SUUGAANTA**

**Qod. 45aad  
(Waxbarashada)**

- 1. Dawladdu waxay mudnaan gaar ah siinaysaa horumarinta, ballarinta iyo faafinta waxbarashada guud, midda farsamada, xirfadda iyo cilmiga, waxayna waxbarashada u arkaysaa maalgelinta ugu habboon ee kaalinta ugu wayn ka qaadanaysa horumarinta siyaasadda, dhaqaalaha iyo bulshada Soomaliyeed.**
- 2. Waxbarashada dalku waa mid u danaynaysu dadweynaha, kuna habaysan waahaya iyo degaanka gaar ahaaneed ee bulshada Soomaaliyeed.**
- 3. Barashada iyo ku-barbaarinta Diinta Islaamka ardada dugsiyada Dawladda iyo kuwa ahliga ah ee la simam waa khasab.**
- 4. Waxaa bannaan in la furto dugsiyo iyo machadyo waxbarasho ahli ah iyo kuwo gaar ah si sharciga waafaqsan.**

**Qod.46aad  
(Waxbarashada asaasiga ah iyo akhris-qoris la'aanta)**

- 1. Dawladdu waxay mudnaanta koowaad siinaysaa waxbarashada asaasiga ah.**
- 2. Waxbarashada asaasiga ah waa lacag la'aan waana xaq ay leeyihiin muwaaddiniinta oo dhan; Dawladda ayaana kafaala qaadaysa.**
- 3. Dawladdu waxay ku hawlgalaysaa ku-baahinta beelaha oo dhan waxbarashada asaasiga ah.**

4. **Ciribtirka akhris-qoris la'aanta iyo waxbarashada dadka waaweyni, waa waajib umadeed, waana in shacbi iyo Dawladda ay isugu geeyaan fulinta waajibkaas.**

**Qod. 47aad**  
**(Horumarinka cilmiga iyo suugaanta)**

1. **Dawladdu waxay horumarinaysaa cilmiga iyo suugaanta waxayna dhiirrigelinaysa hal-abuurkooda iyo cilmi-baarista.**
2. **Xuquuqda qoraalka iyo hindisaha, sharciga ayaa' habaynaya.**

**Qod.48aad**  
**(Dhallinyarada iyo isboortiga)**

1. **Si dhallinyarada loogu xaqiijiyo koritaan jir iyo maskaxeed ee caafimaad qaba, barbaarintooda iyo dareenkooda bulshadeedna kor loogu qaado, Dawladdu waxay ahmiyad gaar ah siinaysaa horumarinta iyo dhiiriigelinta ciyaaraha jirka iyo isboortiga.**
2. **Ciyaaraha jirka iyo isboortigu waa maaddo asaasi ah oo ka mid ah manhajka waxbarashada dugsiyada Dawladda iyo kuwa la siman.**

**MADAXA SADDEXAAD**  
**DHAQANKA IYO DARYEELKA BULSHADA**

**Qod. 49aad**  
**(Horumarinta hiddaha iyo dhaqanka)**

1. **Dawladdu waxay horumarinaysaa hiddaha iyo dhaqanka suubban ee Shacsiga Soomaaliyeed, iyadoo isla markaas laga faa'ideysanayo aqoonta calamiga ee bulshada aadanaha.**
2. **Waxay dhiirrigelinaysaa, horumarinaysaana fanka, suugaanta iyo ciyaaraha waddaniga ah.**
3. **Waxay ururinaysaa, ilaalinaysaa, xannannaynaysaana waxyaabaha iyo xarumaha taariikhiga ah ee dalka, iyadoo horumarinaysa aqoonta iyo farsamada xilkaas lagu gudan karo.**

4. Waxay dhawraysaa caadooyinka wanaagsan waxayna tiigsanaysaa in ay bulshada ka dhex baasi'iso caadooyinka haraaga ah ee wax u dhimaya midnimada, ilbahnimada iyo caafimaadka bulshada.

**Qod. 50aad**  
(Horumarinta miyiga)

Dawladdu waxay ku shaqaynaysa dejinta reer miyiga, iyadoo u abuuraysa duruffaha mawduuciga ah ee negaanshaha ku dhiirrigelin kara, waxayna si wax-ku-ool ah us xoojinaysa barnaamijyada dhaqaale, bulsho iyo maamul ee horumarinta reermiyiga.

**Qod 51aad**  
(Caafimaadka)

2. Dawladdu waxay xil iska saaraysaa caafimaadka guud ee bulshada iyo ka-haqab-tiridda dalka qalabka looga hortagayo iyo ka lagu daweyo cudurrada.
3. Waxay si gaar ah isaga xilsaaraysaa caafimaadka carrurta iyo hooyada iyo-ka-hortagga cudurrada faafa.
4. Waxay dhiirriiginaysaa horumarinta adeegyada caafimaadka iyo xarumaha daryeelka caafimaadka ee gaarka ah.

**Qod. 52aad**  
(Daryeelka qoyska)

1. Qoyska waa asaaska bulshada, waxana tiir u ah diinta, anshaxa iyo daljacaylka.
2. Dawladdu waxay bedbaadinaysaa, dhiirrigelinaysaana guurka.
3. Waxay kafaala-qaadaysaa daryeelka hooyada iyo dhallaanka, iyadoo ka soo saaraysa shurucda loo baahan yahay.
4. Waxay kaloo kafaala-qaadaysaa agoonta naf-hurayaasha difaaca dalka.
5. Xannaanada, barbaarinta iyo waxbarrida carruurta waa waajib saran waalidka, sida sharcigu qabo.
6. Xannaanada waalidka aan isku filnayn, waa waajib saran carrurtisa qaangaarka ah.

**Qod. 53aad.**  
(Xannaanada dadka taagta yar)

1. Dawladdu waxay xil iska saarayasaa xannaanada naafada, carrurta aan waalidka lahayn iyo dadka duqooba, haddi ayna lahayn cid kale oo xannaaneysa.
2. Dawladdu waxay horumarinaysa guryaha xannaanada carrurta iyo xarumaha dhallinyarada.

**Qod. 54aad  
(Haweenka)**

Dawladdu waxay haweenka u abuuraysaa fursado u suurtagelinaya in ay si wax-ku-ool ah uga qayb qaataan nolosha siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho ee dalka.

**Qod. 55aad  
(Shaqada iyo shaqaalaha)**

1. Dawladdu wahay dhawraysaa horumarinaysanaa shaqada noocyadeeda kala duwan.
2. Waxaa reebban shaqo khasab ah, nooc kasta ha ahaatee. Sharciga ayaa tilmaamaya xaaladaha shaqadu khasab noqon karto baahi ciidan, madani ama xukun maxkamadeed dartood.
3. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin, iyadoo aan sina loo kala soocin, mushahar u dhigma qiimaha hawsha ay qabtaan.
4. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin nasasho toddobaad iyo fasax sannadeed oo lacaq leh, lagumana khasbi karo in ay ka tanaasulaan.
5. Sharciga wuxuu xaddidayaa saacadaha shaqada, da'da shaqada lagu geli karo iyo mushahaarka ugu yar, wuxuuna u kaafalaqaadaya dadka da'da yar iyo haweenka shaqooyin ku habboon xaaladdooda.
6. Dawladdu waxay xaq hawlgabka u kafaalaqaadaysaa shaqalaalaheeda, rayid iyo ciidanba. Waxay kaloo kafaala-qaadaysaa in ay si sharciga waafaqsan ugu fidiso taagerero xaaladaha shilalka iyo cudurrada shaqada ka dhasha.

**Qod. 56aad  
(Taakulayanta iyo bedbaadinta bulshada)**

Dawladdu waxay sharci ku jidaynaysaa bedbaadada iyo caymiska bulshada, waxayna horumarinaysaa bulshada, iyadoo xoojinaysaa hay'adaha caymiska guud ee dalka iyo kuwa samafalka dadka tabarta yar.



**QAYTA AFRAAD  
QAABKA DHISMAHA DAWLADDA**

**MADAXA KOWAAD  
GOLAHA SHACBIGA**

**XUBINTA KOOWAAD  
NIDAAMKA GOLAHA SHACBIGA**

**Qod. 57aad  
(Awoodda sharci-dejinta)**

**Awoodda sharci-dejinta dalka waxaa leh Golaha Sharciga.**

**Qad. 58aad.  
(Doorashada Gola Shacbiga)**

- 1. Golaha shacbiga wuxuu ka kooban yahay Xildibaanno muwaaddiniintu ku soo doorteen madax bannaani toos iyo qarsoodi iyo Xildhibaannada kale ee Dastuurka tilmaamay.**
- 2. Tirada Xildibaannada nidaamka iyo habka doorashada waxaa tilmaamaya sharci gaar ah.**
- 3. Xilka Xildibaannada Golaha Shacbiga waxaa loo dooran karaa muwaaddin kasta oo da'diisu ay gaartay 25 sano, Sharci ayaa xaddidaya xaaladaha isadiidmada xilced ama kuwa kale ee aan qofka lagu dooran karin.**
- 4. Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu u magacaabi karaa xildhibaannimada Golaha Shacbiga ilaa afar qof oo dheeri ah, lagana dhex xulo muwaaddiniinta si gaar ah ugu soocma goobaha cilmiga suugaanta iyo fanka ama leh maamus sare oo waddanninimo.**

5. Qof kasta oo noqda Madaxweyne, qaanuun ahaan wuxuu noqonayaa Xildhibaan inta uu nool yahay, haddii ayan maxkamadi ku xukumin demibyada ku xusan qobodka 8aad ee Dastuurka, wuxuuna xildhibaanada ku noqonayaa dheeri.

**Qod. 59aad.**  
**(Muddada xilka)**

1. Muddada xilka Golaha Shacbigu waa shan sano, laga bilaabo maalinta la soo saaro natiijada doorashada.
2. Doorashad Golaha cusub waxaa ku dhawaaqaya Madaxweynaha Jamhuuridda, wxayna dhacaysaa gudaha 30ka malmood ee ugu dambeeya muddada madasha sharci-dejinta socoto.
3. Golaha cusub wuxuu fadhigisaugu horreeya yeelanayaa 30 malmood gudahoo, laga bilaabo maalinta lagu dhawaaqay natiijada doorashada.
4. Markii ay timaaddo duuruf suurtagelin wayda in doorasho la qabto, Madaxweynaha Jamhuuriyaddu isagoo la tashaday Guddomiyaha Golaha Shacbiga iyo Wasiirka Kowaad, wuxuu awood u leeyahay in uu muddada ku kordhiyo waqti aan hal sano ka badnayn.

**Qod. 60ad**  
**(Kala diridda Golaha Shacbiga)**

1. Golaha Shacbiga waa la kala diri karaa, isagoon waqtigiisu dhammaan, marka ay talo ku soo jeediyaan saddex meelood meel Xildhibaanada Goluhu ayna isku raacaan saddex meelood laba.
2. Waxaa kale oo kala diri kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda, isagoo la tashaday Guddomiyaha Golaha Shacbiga markii ay caddaato in Goluhu xilkiisii gudan kari waayay ama u qabanayo si ka soo horjeedda danta sharci-dejinta.
3. Golaha lama diri karo sannadka xilkiisa ugu horreeya iyo sanadka xilka Madaxweynaha ugu dambeeya.
4. Doorashad Golaha cusubi waxay dhacaysa saddex bilood gudahood, laga bilaabo maalinti lagu dhawaaqo go'aanka kala diridda Golaha.
5. Ilaa iyo inta laga soo saarayo natiijada doorashada Golaha cusub, xilka sharci-dejinta waxaa sii haynaya Golaha la kala diray.

**Qod. 61aad.**  
**(Kalfadhiyada)**

- 1. Golaha Sacbigu sannadkiiba waxa uu yeelanayaa laba kalfadhi.**
- 2. Goluhu wuxuu isugu imaan karaa kalfadhi aan caadi ahayn marka uusoo jediyo Madaxweynaha Jamhuuriyaddu, ama Guddoomiyaha Goluhu uu usugu yeero, ama ay codsato xukuumada ama saddex meelood meel Xildhibaanada Goluhu ay waydiistaan.**

**Qod. 62aad.**

**(Fadhiyada iyo go'aannada Golaha)**

- 1. Golaha Shacbigu wuxuu fadhigiisa ugu horreeya ka dhex dooranayaa xubnihiisa Guddoomiye, Guddoomiye ku-xigeenno iyo xubnaha kale ee xafiiska guddoonka.**
- 2. Fadhiyada Goluhu waa u furan yihiin dadweynaha. Hase yeeshee fadhiyo qarsoodi ah waa la qaban karaa haddii ay soo jeediyaan Madaxweynaha, Xukuumadda ama ugu yaraan afar meelood meel Xildhibaanada, Goluhuna aggolaado.**
- 3. Fadhiyada Goluhu wuxuu ku ansaxaya marka ka soo gayb galaan Xildhibaanada intooda badan.**
- 4. Go'aannada Goluhu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah, haddii Dastuurka ama sharcigu uusan tilmaamin aflabiyad gaar ah.**
- 5. Xilka sugidda nabadgelyada wuxuu saran yaxay Guddoomiyaha Golaha ama qofka xilkiisa sii haya.**

**Qod. 63aad**

**(Ka-kayb-galka xubnaha Xukuumadda)**

- 1. Wasiirka Koowaad, Wasiirrada iyo Wasiir-ku-xigeennadu waxay xaq u leeyihiin in ay ka qayb galaan fadhiyada Golaha iyo guddiyadiisa, lana dhegeysto marka ay hadal weydiistaan. Waxaa kaloo fadhiyada ka qayb geli kara, lana dhegeysanayaa, hawl-wadeennada sare iyo xeeldheerayaasha xubnaha Xukuumaddu ay si gaar ah u xilsaartaan.**
- 2. Xubnaha Xukuumadda waa ku waajib in ay goobjoog ka ahaadaan fadhiyada marka Golaha Shacbigu waydiisto.**
- 3. Xubinta Xukuumadda ee aan Xildhibaan ahay, cod kuma laha Golaha.**

**Qod. 64aad  
(Xeer-hoosaadka)**

**Habka shaqada Golaha Shacbiga waxaa lagu nidaaminayaa xeerhoosaad Goluhu guddoonsado, waxaana soo jeedin kara Guddoomiyaha ama ugu horaan shan Xildhibaan.**

**Qod. 65aad  
(Awoodda Golaha)**

**Golaha Shacbigu wuxuu leeyahay awodha soosocda:**

- a) **wax-ka-beddelka Dastuurka;**
- b) **dejinta sharciyada iyo oggolaanshaha go'aannada saameeya horumarka dalka;**
- l) **oggolaanshaha heshiisyada caalamiga ah ee saameeya difaaca iyo nabadda gobannimada iyo madaxbannaanida Jamhuuriyadda; heshiisyada ku saabsan siyaassadda, dhaqaalaha, ganacsiga iyo kuwa Dawladda u keenaya mas'uuliyad lacageed;**
- j) **oggolaanshaha qorshaha horumarinta dhaqaalaha dalka;**
- k) **la-xisaabtanka Xukuumadda iyo xubnaheeda;**
- kh) **awoodaha kale ee Datuurka lagu siiyey;**

**Qod. 66aad  
(Xildhibaanaka)**

1. **Xildhibaan kasta masilayaa danta guud ee Shacbiga Soomaaliyeed.**
2. **Xildhibaanaku, marka uu hawsha Golaha bilaabay, wuxuu marayaa dhaarta soo socota.**

**“Waxaah Magaca Ilaahay ku marayaa inaan dhawro Dastuurka iyo Shuruucda Dalka inaan kartidayda oo dhan difaaco madaxbannaanida, gobannimada iyo midnimada Dalka iyo Dadka Soomaaliyeed inaan ammaano iyo hagar la'aan ugu adeego danaha Shacbiga Soomaaliyeed”.\***

3. **Xildhibaanka dhibaato kama soo gaari karto fikradaha araaqda ama codka uu ka hor dhiibto Golaha iyo guddiyadiisa, isagoo gudanaya xilkiisa.**
4. **Haddii aan laga haysan oggolaansho Golaha Shacbiga. Xildhibaanka Laguma qaadi karo dacwad ciqaabeed; lama xiri karo lamina baari karo qof ahaan, hoygiisa ama meshii kale u gaar ah, haddaan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi sharci ahaan khasab ay tahay in laga soo saaro amar qabasho; sidoo kale haddii aan laga helin oggolaansho Golaha Xildhibaanka lama qaban karo xabsina laguma hayn karo iyadoo la fulinaayo xukun maxkamadeed oo xataa kama dambays noqday.**
5. **Dacwad aan ahayn mid ciqaabeed Xildhibaanka waa lagu furi karaa, iyadoo ann oggolaansho la weydiisan Golaha Shacbiga.**
6. **Xildhibaanku wuxuu xaq u yeelanayaa gunno iyo bursiino fadhi oo sharci gaaraha midaamiyo.**

**Qod. 67aad  
(Duridda xidhibaannimada)**

1. **Awoodda go'aan-ka-gaaridda cabashooyinka la xihira buuxin la'aanta shuruudaha qof Xildhibaan loogu dooran karo ama uu ku sii ahaan karo, waxaa leh Maxkamadda Sare.**
2. **Doorte kasta wuxuu soo jeedin karaa cabasho sababaysan soddon maalmood gudahood, laga bilaabo taariikhda ku dhawaaqidda natijada doorashada ama taariikhda ay soo ifbaxday sabata aan xildhibaan lagu noqon karin ama keentay isdiidmada xileed.**
3. **Maxkamadda Sare waxay go'aankeeda ku soo saaraysaa 90 maalmood gudahood, laga bilaabo dhammaadka muddada faqradda hore ee qodobkan ku tilmaaman.**
4. **Haddii Maxkamadda Sare ay oggolato cabashada, Golaha Shacbiga wuxuu dhawaaqayaa in kursiga Xildhibaan ku bannaanaaday, waxaana loo buuxinayaa sharcigu qabo.**

**XUBINTA LABAAD  
QABKA SHARCI DEJINTA IYO AWOOD  
KALE EE GOLAHA**

**Qod. 68aad  
(Mashruuc sharci)**

1. Mashruuc sharci waxaa soojeedin kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda ama Xukuumadda. Waxaa kaloo soo jeedin kara Xildhibaanada Golaha Shacbiga ama 10,000 oo ka mid muwaaddiniinta xaq doorashada leh.
2. Sharciga ayaa nidaaminaya habka muwaaddiinnintu ay soo jeedin karan mashruuc sharci, mana saamayn karan soojeedintu arrimo la xiriira canshur.
3. Mashruuca sharci ee Xildhibaanadu so jeediyaan waxaa dood laga furi karaa marka ey soojeedintu taageeraan ugu yaraan shan Xildhibaan.
4. Mashruuc sharci kasta inta uusan Goluhu ka doodin waxaa ka soo baaraandegaya guddiga Golaha eek u shaqada leh oo gungaarki baaristiisa warbixin ka siinaya Golaha.
5. Haddi mashruuc sharci ka gudbi waayo Golaha; waxaa isla mashruucaas dib loogu soo celin karaa lix bilood kaddib, laga bilaado taarikhda go'aanka diidmada Golaha.

**Qod. 69aad**  
(Soo saaridda iyo faafinta sharciga)

1. Sharci kasta oo Golaha Shacbiga isku raaco waxaa soo saaraya Madaxweynaha Jamhuuriyadda soddon maalmood gudohood.
2. Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay muddada ku xusan faqradda laad ee qodobkan dhexdeeda in uu sharcigaas dib ugu celiyo Golaha Shacbiga, isagoo sababta raacinaya, codsanayana in dib looga dodo, go'aanna laga gaaro.
3. Xubnaha Goluhu, saddex meelood laba haddii ay isku raacaan sharcigaas mar kale, Maxahweynuhu waa in uu ku soo saaraa soddon maalmood gudahood.
4. Haddi Goluhu ku caddeeyo cod hal dheeri ah in sharcigu degdeg yahay, waa in lagu soo saaro muddada Sharciga lagu tilmaamay oo aan marna ka yarran karin shan maalmood.
5. Sharciga Goluhu isku raaco, Madaxweynuhu-na soo saaro, waxaa lagu baahinaya Faafinta Rasmiga ah, wuxuuna dhaqangalayaa 15 maalmood kaddib mar lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah, hadduusan sharcigu muddo ka duwan sheegin.

**Qod. 70aad**  
(Xilsaarasho sharci-jedin)

1. **Golaha Shacbigu wuxuu Xukuumadda u wakiilan karaa in ay ka soo saarto, waqti xaddidan gudihiisa iyo arrimo xaddidan axkaam leh awood sharci. Sharciga xilsaarashada waa lagu tilmaami karaa mabaadi'da ama tilmaamaha in la raaco loo baahan yahay.**
2. **Sharciga xukuumadda loo wakiishay waa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne.**

**Qod. 71aad  
(Xeer-sharci)**

1. **Marka ay jirto baahi degdeg ah, Xukuumad waxay dejin kartaa axkaam ku-meel-gaar ah leh awood sharci oo lagu soo saaro. Madaxweyne, Muddo bil ah gudaheed, waana xeerka sharcig lagu horgeeyaa Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.**
2. **Golaha Shacbigu, marka usu kulansan yahay waa in uu go'aan ka gaaraa 15 maalmood gudahood laga bilaabo taarikhda xeer Sharci la soo saaray ama 15 maalmood gudahood, laga bilaabo fadhigiisa ugu horreeya, marka Goluhu uusan kulansanayan.**
3. **Haddii loo rogi waayo sharci, xeerka-sharci wax raad ah yeelan mayo laga bilaabo malintii la soo saaray. Hase yeshee Goluhu wuxu awood u leeyahey in uu tilmaamo taarikh ka duwan oo uu raadka xeerka sharci ku go'ay ama in uu si kale habeeyo xiriirka qanuunee ka dhashay.**

**Qod. 72aad  
(Cafiska guud iyo cafiska gaar ahaaneed)**

1. **Golaha Shacbigu wuxuu sharci uu ku guddoonsaday saddex meelood laba xubnihiisa ugu xilsaari karaa Madaxweunaha Jamuuridda in uu bixiyo cafis guud iyo mid gaar ahaaneed.**
2. **Cafiska guud iyo midka gaar ahaaneed masameyn karran dembiyada la galay soojeedinta mashruuca sharci kaddib.**

**Qod. 73aad  
(Miisaaniyadaha)**

1. **Xukuumaddu wahay Golaha Shacbiga soo hordhigeysaa, ugu yarran laba bilood ka hor dhammaadka sannad maliyeedka, mashruuca miisaaniyada ku-talo-galka ee Dawladda waxayna miisaaniyaddu dhaqangal noqoneysaa marka Goluhu sharci ku guddoonsado.**

2. **Miisaaniyadda waxaa looga doodayaa looguna codaynayaa madax madax.**
3. **Haddii miisaaniyadda la guddoonsan waayo bilowga sannadka cusub ka hor, waxaa muddo aan ka badnayn saddex bilood lagu sii dhaqmayaa miisaaniyaddii sanadkii hore.**
4. **Goluhu wuxuu sharci ku oggolaanayaa isuwareejinta madaxyada miisaaniyadda.**
5. **Sharciga oggolaanshaha miisaaniyaddu ma jidayn karo canshuuro iyo kharajyo cusub.**
6. **Gudaha lixda billod oo sannad kasta ugu horreysa., Xukuumaddu waa inay Golaha Shacbiga soo hordhigtaa miisaaniyadda xisaabxirka ee sannad-maaliyadeedkii la soo dhaafay, si loo oggolaado.**
7. **7. Sharciga ayaa tilmaamaya qabka loo diyaarinayo miisaaniyadaha iyo sannad-maaliyadeedka.**

**Qod. 74aad  
(Canshuuraha)**

1. **Canshuur waxaa lagu jidayn karaa, lagu beddeli karaa, lagu baabi'in karaa ama lagu laali karaa sharci keliya.**
2. **Canshuuraha la qaado iyo dakhliyada kale Dawladda waa in lagu shubaa khasnada Maaliyadda, ayna ka mid noqdan miisaaniyadda Dawladda, haddii sharci uusan si ka duwan u tilmaamin.**
3. **Mashruuca sharci ee Dawladda u keenay o kharaj cusub ama ka badan ku-tolo-galki hore waa in uu tilmaamaa meelaha laga bixinayo kharajka cusub.**

**Qod. 75aad  
(Xaaladda dagaalka)**

**Ku dhawaaqidida xaaladda dagaalka waxaa idmaya Golaha Shacbiga, wuxuuna Xukuumad sinayaa awoodaha lagama maarmaanka'ah.**

**Qod. 76aad  
(Kormerka Golaha)**

1. **Xildhibaan kasta waxa kaloo xaq leedahay inu u jeediyo Xukuumadda ama xubnaheed su'aalo iyo afti oo ay waajib ku tahay in ay ka jawaabaan**



labaatan maalmood gudahood. Xildhibaanka waxhuu kaloo xaq u leeyahay inuu hordhigo Golaha Shacbiga mashruuc qaraar.

2. Goluhu wuxuu amri karaa in baaris la sameeyo isagoo u xilsaaraya waajibkaas guddiyo ka kooban Xildhibaanno iyo xeeldheerayaal.

**MADAXA LABAAD**  
**MADAXAWEYNAHA JAMHUURIYYADDA**

**Qod. 77aad**  
**(Madaxa Dawladda)**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda waa madaxa Dawladda, waxuuna masilaa awoodda Dawladda midnimada iyo gobannimada Shacbiga Soomaaliyeed.

**Qod. 78aad**  
**(Shuruudaha doorashada)**

1. Waxaa loo dooran karaa xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda muwaaddin kastoo Soomaaliyeed, Muslim ah, abbihiis iyo hooyadiis Soomaali asal ah yihiin, horay an u gursan, inta uu xilka hayana guursanin qof aan Soomaali asal ahayn, leh shuruudaha lagu dooran karo Xildhibaanka, da'diisuna gaartay 45 sano
2. Madaxweynaha Jamhuuriyadda uma bannaana, muddada uu xilka hayo, in uu qabto xilal kaloo guud oo aan ahayn xaq codbixinta. Sidoo kale waxaa ka reebban inuu qabto mehered madaxbannaan, ama howlo ganacsi, maaliyadeed, warshadeed ama inuu iibsado ama ijaarto hanti dawladeed ama inuu hantidiisa ka gado ama ka ijaaro Dawladda.

**Qod. 79aad**  
**(Habka doorashada)**

1. Madaxweynaha Jamhuuriyyada Shacbiga ayaa toos u dooranaya waxaana soo sharaxa axsaabta siyaasiga. Waxaa kale oo xilka Madaxweynaha iskiis isigu soo sharixi kara muwaaddin kasto oo buuxiya shuruudaha ku tilmaamaan qodobka 78aad.
2. Nidaamka iyo habka doorashada Madaxweynaha sharci gaar ah ayaa tilmaamaya.

3. **Abaabulks doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu bilaad mayaa lixdan maalmood ka hor ayna dhammaam muddada xilka Madaxweynaha, doorashaduna wee in ay dhacdaa labaatan maalmood ka hor inta ayna muddadu dhammaan.**
4. **Madxweyne waxaa noqonaya murashaxa hela aqlabiyadda codka doortayaasha ee aansaxa ah. Haddii murashxna uu ku guulaysan wayoo helidda tiradaas, labada murashax ee codka u badan hessa waxaa loo qabanayaa doorasho cusub, soddon maalmood guhahood, laga bilaabo maalinta lagu dhawaaqay natijada doorashada, waxaana Madaxweyne noqonaya murashaxa codka ansaxa ah ee ugu badan hela.**

**Qod. 80aad**  
**(Muddada xilka iyo dhaarta)**

1. **Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu xilka haynaya lix sana, laga bilaabo maalina la dhariyo, mar keliya ayaana dib loo dooran karaa.**
2. **Marka uu hawsha bilaabay, Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu Golaha Shacbiga hortiisa ku marayaa dharta ku xusan qodobka 66aad.**

**Qod 81aad**  
**(Gunnada)**

**Gunnada iyo hantida dawladeed ee uu kuu dhaqmayo Madaxweynuhu, sharci ayaa tilmaamaya.**

**Qod 82aad**  
**(Xil gudasho karid la'aan)**

1. **Xaaladda geerida, istiqaalada ama xil gudasho karid la'aanta joogtada ah ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda, doorashada Madaxweynaha cusub waxaa loo raacayaa habka ku tilmaaman qotobka 79aad, doorashaduna waa inay dhacdaa lixdan maalmood gudahood.**
2. **Inta ay ka dhacayso doorashada faqradda hore ku tilmaaman iyo xaaladda xil laalidda eek u xusan qodobka 85aad ama mar kastoo ay jirto xil gudasho karid la'aan aan joogto ahayn xilalka Madaxweynaha jamhuuriyadda marka laga reebo kuwa ku tilmaaman faqradda 2aad ee qodobka 60aad, xarafka (x) ee qotobka 83aad, faqrada 3aad iyo 4aad ee qotobka 87aad, faqrada 2aad ee qotobka 88aad iyo faqradda 1aad ee qotobka 118aad, waxaa ku-meel-gaar ahaan u sii qabanaya Guddoomiyaha Golaha Shacbiga.**

3. **Xaaladda istiqaalada, Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu qoraal ku ogeysiinayaa Golaha Shacbiga.**

**Qod. 83aad**

**(Awoodaha iyo xilalka Madaxweynaha)**

1. **Awoodaha iyo xilalka Dastuurka iyo Shuruucdu ay siinayaan Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxaa u weheliya kuwa soo socda:**
- a) **ilaalinta Dastuurka iyo Shuruucda Dalka**
  - b) **u fasixida Xukuumadda in ay Golaha Shacbiga horgeeyso mashruuc sharci**
  - l) **meelmarinta heshiisyada caalamiga ah ee Golaha Shacbigu oggolaado**
  - j) **meelmarinta heshiisyada kale ee caalimiga ee Dawladda ama xubnaheedu dhinac ka yihiin**
  - x) **u baandhigidda afti shacbi arrimaha muhiimka ah ee la xiriira danaha waaweyn ee dalka;**
  - kh) **aqoonsiga iyo qaabilaadda danjirayaasha iyo ergooyinka diblomaasiga ah**
  - d) **magacaabidda iyo xil-ka-qaadidda saraakiisha sare ee Dawladda marka uu oggolaado Golaha Wasiirradu;**
  - r) **in uu bixiyo masaabax, ciqaabtana dhimo;**
  - s) **waa Taliyaha Sare ee Ciidammada Qalabka Sida;**
  - sh) **Kudhawaaqidda xaaladda dagaalka, kaddib marka uu go'aamiyo Golaha Shacbigu, si wafaaqasan qodobka 75aad;**
  - dh) **bixinta billadaha iyo aqoonsiyada mudnaana ee kale**
2. **Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu isticmaalka awoodaha ku tilmaaman Dastuurka ku soo saarayaa xeer.**

**Qod. 84aad**

**(Awoodaha aan caadiga ahayn ee Madaxweynaha)**

1. **Marka ay dalka la soo gudboonaadaan arrimo wax-kaqabasho degdeg ah u baahan oo khatar culus ku ah qarannimada, midnimada dhulka, nabadgelyada gudaha ama dibadda ama xilgudashada hay'adaha dastuuriga ah ee dalka, madaxweynaha Jamhuuriyadda wuxuu qaadayaa tallaabooyinka xaaladahaas looga hor-tegi karo, isagoo la tashanayaa Guddoomiyaha Golaha Shacbiga iyo Wasiirka Koowaad.**
2. **Madaxweynaha Jamhuuriyaddu wuxuu wargelinayaa shacbiga, wuxuuna tallaabooyinka la qaaday hordhiqayaa Golaha Shacbiga 30 maalmood gudohood, si loo oggolaado.**

3. **Go'aannada Madaxweynuhu waa in ay ahaadaan kuwo ujeeddadoodu tahay in ay sida ugu dhakhsaha badan ugu xaqiijiyaan hay'adaha dastuuriga ah ee dalka hanashada xilalkooda. Si kastaba, muddada dhaqan galkoodu kama badnaan karto lix bilood. Hase yeshee, haddii dhibaataadu sii socoto, Golaha Shacbigu muddada waa kordhin karaa.**

**Qod. 85aad  
(Mas'uuliyadda)**

1. **Mas'uuliyadda go'aannada Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu soo saaro waxaa qaadaya, lana saxiixaya Wasiirka Koowaad iyo Wasiirka hadba ku shaqo leh arrinta go'aanku uu khuseeyo.**
2. **Madaxweynaha Jamhuuriyaddu waxuu mas'uul ka noqonayaa dembiyada khiyaano qaran iyo ku-xadgudub nidaamka datuuriga ah ee dalka.**
3. **Ku-eedaynta Madaxweynaha Jamhuuriyadda dembiyadda khiyaano qaran ama ku xadgudub nidaamka datuuriga ee dalka, waxaa soo jeedin kara ugu yaraan saddex meelood meel Xildhibaannada Golaha Shacbigu na wuxuu ku guddoonsanayaa saddex meelood laba xubnihiisa, waxaana lagu maxkamadaynayaa Maxkamadda Sare oo isu beddelaysa Maxkamadda Caddaaladda Sare horteeda oo keli ah.**
4. **Marka laga reebo xaaladaha faqradda hore ku tilmaaman, Madaxweynaha Jamhuuriyadda laguma qaadi karo dacwad ciqaabed, haddi aan laga helin Golaha Shacbiga oggolaansho uu ku guddoonsado saddex meelood laba xubnihiisa.**
5. **Oggolaanshaha maxkamadaynta Madaxweynaha waxa ay keenaysaa xil la'aan.**

**MADAXA SADDEXAAD  
XUKUUMADDA  
XUBINTA KOOWAAD  
NIDAAMKA XUKUUMADDA**

**Qod. 86aad  
(Awoodda Fulinta)**

**Awoodda fulinta waxaa leh Madaxweynaha Jamhuuriyadda iyo Xukuumadda, waxayna qabanayaan sida Dastuurka ku tilmaaman.**

**Qod. 87aad  
(Dhismaha Xukuumadda)**

- 1. Xukuumaddu waa hay'adda fulinta maamulka ugu sarrayaa ee Dawladda, waxay ka kooban tahay Wasiirka Koowaad ee Wasiirrada.**
- 2. Kulanka wadajirka ah ee wasiirku Koowaad iyo Wasiirrada waxaa ka samaysmaya Golaha Wasiirrada.**
- 3. Wasiirka Koowaad waxaa magacaabaya xilkana ka qaada Madaxweynaha Jamhuuriyadda.**
- 4. Wasiirrada waxaa magacaabaya, xilkana la qaada Madaxweynaha Jamhuuriyadda isagoo dhegeystay soojeedinta Wasiirka Koowaad.**
- 5. Wasiir kasta wuxuu si shakhsi ah mas'uul uga yahay hawlaha Wasaaraddiisa.**
- 6. Xubnaha Xukuumaddu waxay si wada jir ay mas'uul uga yihiin hawlaha Golaha Wasiirrada.**
- 7. Istiqaalada Wasiirka Koowaad waxay keenaysaa dhicidda xukuumadda.**

**Qod. 88aad  
(Wasiir-ku-xigeenno)**

- 1. Wasiirrada waxaa xilkooda ku kaalin kara Wasiir-ku-xigeenno, waxayna qabanayaan xilalka loo wakiisho.**
- 2. Wasiir-ku-xigeennada waxaa magacaabaya, xilkana ka qaada Madaxweynaha Jamhuuriyadda, isagoo dhegeystay soo jeedinta Wasiirka Koowaad.**

**Qod. 89aad  
(Shuruudaha Xubinnimada Xukuumadda)**

- 1. Qofka loo magacaabay Wasiir ama Wasiir-ku-xigeen waa in uu yahay muwaaddin, da'diisu gaartay 30 sano, lehna shuruudaha qof Xildhibaan loogu dooran karo.**

2. Wasiirka iyo Wasiir-ku-xigeenka uma bannaana muddada ay xilka hayaan, in ay qabtaan xilal kaloo guud oo aan ahayn xaqa cod-bixinta iyo xilka xildhibaannimada Golaha Shacbiga. Waxaa kale oo aan u baannaanayn in ay qabtaan meherad madaxbannaan ama hawl ganacsi, maaliyadeed ama warshadeed, ama in ay iibsadaan ama ijaartaan hanta dawladeed ama in ay hantidooda ka gadaan ama ka ijaaraan Dawladda.

**Qod. 90aad  
(Dhaarta)**

Wasiirrada iyo Wasiir-ku-xigeennadu, inta ayan xilkooda bilaabin, waxa ay Madaxweynaha Jamhuuriyadda hortiisa ku marayaan dhaafta ku xusan Qod. 66aad.

**Qod. 91aad  
(Kalsoonida Golaha Shacbiga)**

1. Magacaabidda Xukuumadda kaddib, Wasiirka Koowaad wuxuu Golaha Shacbiga soo hordhigayaa barnaamijka xukuumaddu ay doonayso in ay hirgeliso.
2. Xukuumaddu, 30 maalmood gudahood, waainay weydiisataa Golaha Shacbiga kalsooni Golaha Shacbigu wuxuu kalsoonida ku oggolaanayaa ama ku diidayaa cod furan ooh al-dheeri ah.
3. Kala-noqoshada Xukuumadda kalsoonida waxaa soo jeedin kara labaatan Xildhibaan iyagoo caddaynaya sababta, waxaana lagu doodayaa ugu yaraan shan maalmood kaddib soojeedintooda, Goluhu wuxuu kala noqoshada kalsoonida ku guddoonsanaya cod furan ooh al-dheeri xubnihiisa ah.
4. Helid la'aanta kalsoonida Golaha Shacbigu waxay keenaysaa dhicidda Xukuumadda.
5. Xukuumadda dhacda, waxay sii wadaysaa hawlaha maamulka caadiga ah inta xukuumad kale laga dhisayo.

**XUBINTA LABAAD  
HAWLAHA XUKUUMADDA IYO  
HAY'ADAHA RAACSAN**

**Qod. 92aad**  
**(Xilalka Golaha Wasiirrada)**

**Golaha Wasiirradu waxa uu leeyahay awoodaha soo socda:-**

- a) **la-dejinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda siyaasadda guud ee Xukuumadda oo ay wadajir u hubinayaan dhaqan-gelinteeda;**
- b) **ogolaanshaha xeerarka maamulka iyo kuwa falinta, si waafaqsan shuruucda;**
- l) **diyaarinta mashruucyada sharci iyo soo-hor-dhigiddooda Golaha Shacbiga;**
- j) **diyaarinta miisaaniyad-sannadeedka iyo xisaab-xirkooda;**
- x) **dejinta qorshaha guud oo lagu hormarinaayo dalka;**
- kh) **dabagalka dhaqan-geli nta shuruucda, sugidda nabadgelyada dalka iyo ilaalinta danaha Dawladda;**
- d) **ogoolaanshaha magacaabidda iyo xil-ka-qaadidda saraakiisha sare ee Dawladda;**
- r) **owoodaha kale ee Dastuurka ama shuruucda lagu siiyey.**

**Qod. 93aad**  
**(Xilalka Wasiirka Koowaad)**

1. **Wasiirka Koowaad wuxuu mas'uul ka yahay jihatnata siyaasadda guud ee Xukuumadda, wuxuuna ilaaliyaa isku-xirnaanta siyaasadda xukuumadda, isagoo isku duwaya, kormeerayana hawlaha Wasaaradaha.**
2. **Wasiirka Koowaad waxaa go'aannada la saxiixaya, marka ay baahidaasi jirto, Wasiirka u xil-saaran fulintooda.**

**Qod. 94aad**  
**(Nidaamka Xukuumadda)**

1. **Awoodaha iyo xilalka Wasiirka Koowaad iyo Golaha Wasiirrada ee aan Dastuurka ku xusnayn, xilalka iyo tirade Wasaaradaha, waxaa lagu caddeynayaa sharci gaar ah.**
2. **Qaab-dhismeedka xafiisyada Wasiirka Koowaad iyo Wasaaradaha iyo xafisyada ee raacsan waxaa lagu nidaaminayaa X.. Madaxweyne.**

**Qod. 95aad**  
**(Mas'uuliyadda ciqaabeed ee Wasiirrada)**

1. Wasiirka Koowaad iyo Wasiirradu waxay mas’uul ka yihiin dembiyada ka dhankaah Gudashada xilalkooda.
2. Dembiyada faqradda hore ee qodobkan tilmaaman, waxaa Wasiirka Koowaad iyo Wasiirrada ku soo eedayn kara shan meelood meel Xildhibaannada, Goluhuna wuxuu guddoonsanaya saddex meelood laba xubnihiisa, waxaana lagu hor max kamadana yaa Maxkamadda Sare oo isu beddelaya Maxkamadda Caddaaladda Sare.
3. Marka laga reebo xaaladaha kor ka tilmaaman, Wasiirka Koowaad iyo Wasiirrada laguma qaadi karo dacwad ciqaabeed, hadii aan laga helin Golaha Shacbiga oggolaansho uu ku guddoonsado saddex meelood laba xubnihiisa.
4. Xubinta Xukuumadda ee dacwadeeda loo gudbiyo Maxkamadda Caddaaladda Sare waxay ka joogsanaysaa gudashada xilka ay haysay.
5. Wasiir-ku-xigeennada, dhanka mas’uuliyadda waxaa lagu dhaqayaa axkaanta qodobkan lo tilmaaman.

**Qod. 96aad**  
(Awoodda xeer-nidaaminta)

1. Xeer-nidaamyada waxaa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne, kaddib marka Golaha Wasiirradu uu oggolaado.
2. Waxaa sharci lagu siin karaa hay’adaha kale ee Dawladda iyo kuwa guud awood ay ku soo saaraan xeer-nidaamiye habaynaya arrimo gaar ah.

**Qod. 97aad**  
(Hawladeennada iyo Shaqaalaha Dawladda)

1. Hawlwadeennada iyo Shaqaalaha Dawladdu waxay xilkooda u gudanayaan si waafaqsan sharciga iyo danta guud oo keliya.
2. Hawlwadeennada iyo shaqaalaha Dawladdu ma noqon karaan hoggaamiyayaal axsaab.
3. Sharcigu wuxuu xaddidayaa qaybaha shaqaalaha Dawladda ee ka reebban in ay xubno ka noqdaan axsaab siyaasadeed iyo hawlaha aan la socon Karin xilalka ay hayaan.
4. Xaaladda qaanuun ee shaqaalaha Dawladda waxaa nidaaminaya sharciga.
5. Shaqada joogtada ah ee Dawladda, waxaa looga mid noqon karaa tartan furan oo keliya, marka laga reebo xaaladaha sharcigu tilmaamay.

**Qod. 98aad**  
(Guddiga Shaqada Dawladda)



1. Sharcigu wuxuu nidaminayaa Guddiga Shaqada Dawladda qaabkiisa dhismo iyo awoodihiisa.
2. Sharciga dhisidda guddiga waa in dammaanad-qaadaa u-madax-bannaanka hawlihiisa.

**XUBINTA SADDEXAAD  
CIIDAMMADA QALABKA SIDA  
IYO GUDDIGA DIFAACA QARANKA**

**Qod. 99aad  
(Ciidammada Qalabka Sida)**

1. Dawladda keliya ayaa dhisi karta Ciidammada Qalabka Sida, umana bannaana koox ama hay'ad kastoo kale in ay abuurto urur ka dabeecada ciidan ama ciidan-u-yaala
2. Ciidammada Qalabka Sida, waxay u xilsaaran yihiin ilaalinta gobannimada iyo madaxbannaanida Jamhuuriyadda midnimada iyo nabadgelyada dalka.
3. Sharci gaar ah ayaa tilmaamaya dhismaha iyo qaabka ay u habaysan yihiin Ciidammada Qalabka Sida.

**Qod. 100aad  
(Guddiga Difaaca Qaranka)**

1. Waxaa la dhisayaa guddi lagu magacaabo Guddiga Difaaca Qaranka oo uu Guddoomiyuhu yahay Madaxweynaha Jamhuuriyaddu, una xilsaaran qumeynta arrimaha la xiriira difaaca iyo nabadgelyada dalka.
2. Sharciga ayaa tilmaamaya awoodaha kale ee Guddiga iyo xubnihiisa.

**XUBINTA AFARAAD  
BAAHINTA AWOODDA MAAMULKA  
DALKA**

**Qod. 101aad  
(Fidinta Maamulka)**

1. Xilalka maamul ee Dawladda, waxaa lagu fidinayaa, inta ay suurto-gal tahay, hay'adaha degaannada iyo hay'adaha guud.
2. Hay'adaha degaannada ee Jamhuuriyaddu waa gobollada iyo degmooyinka.

3. Sharcigu waa abuuri karaa hay'ad degaan oo ka duwan kuwa kor ku tilmaaman.

**Qod. 102aad**  
(Awoodda Hay'adaha Degaannada)

1. Awoodda hay'adaha degaannada iyo maamulkoodu waa qayb ka mid ah awoodda dhexe ee Dawladda.
2. Hay'adaha degaannadu waxay leeyihiin shakhsiyaad qaanuun iyo madaxbannaani xagga arrimaha la xiriira maamulka degaankooda.
3. Sharciga ayaa nidaaminaya awoodda hay'adaha degaanka, isagoo ku salaynaya hab dimoqraaddi ah.

**Qod. 103aad**  
(Golayaasha Degaanka)

1. Degaannadu waxay yeelanayaan goleyaal uu xubnahooda dadweynuhu ku soo doorto madaxbannaani, toos iyo qarsoodi.
2. Qaabka dhismaha, nidaamka doorashada muddada madasha, xilalka ilaha dhaqaalaha dammaanadda ay leeyihiin xubnuhu iyo awoodda xeerineed ee heer degaan iyo golayaasha degaanka, waxaa nidaaminaya sharci gaar ah oo tiigsanaya in uu ku wareejiyo golayaasha degaanka awoodda maamulka ee Dawladda, hadba inta ay hanan karaan, iyado la tixgelinayo horumarka siyaasadeed dhaqaale iyo bulsho ee degaannadu gaareen.

**XUBINTA SHANAAD**  
**HAY'ADAHA KALKAALINTA**

**Qod. 104aad**  
(Hantidhowrka Guud)

1. Hantidhowrka Guud waa hay'adda u xilsaaran hubinta hore ee waafaqsanaanta sharciga go'aannada xukuumadda ee keenaya culays maaliyadeed iyo hubinta dambe ee habka loo maamulay miisaaniyadda Dawladda.
2. Wuxuu siyaabaha sharcigu tilmaamay uga qayb qaataa barista maamulka maaliyadeed ee hay'adaha ay Dawladdu si caadi ah ama si aan caadi ahayn u siiso kaalmo wax-ku-ool ah.
3. Wuxuu natijada baaristiisa u gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda iyo Golaha Shacbiga.

4. Sharciga nidaaminaya qaab-dhismeedka Hantidhowrka Guud, wuxuu hay'adda u sugayaa madaxbannaani xagga xil-gudashadeeda, kuwa la baarayana dammaanad is-daafac.

**Qod. 105aad**

**(Golaha Qaranka ee dhaqaalaha iyo shaqada)**

1. Golaha Qaranka ee Dhaqaalaha iyo Shaqadu waa hay'ad kala talisa Golaha Shacbiga iyo Xukuumadda arrimaha dhaqaalaha iyo shaqada ee dalka, si waafaqsan sharciga dhismihiisa.
2. Goluhu wuxuu ka koobmaa xeel-dheerayaal iyo wakiillo masila qaybaha wax-soo-saarka ee kala duwan, iyadoo la tixgelinayo ahmiyadda tiro iyo tayo oo ay leeyihiin.

**MADAXA AFARAAD  
GARSOORKA**

**Qod. 106aad**

**(Awoodda iyo madaxbannaanida Garsoorka)**

1. Awoodda Garsoorka waxaa leh Maxkamadaha.
2. Garsoorku waa ka madaxbannaan yahay awoodda sharci-dejinta iyo tan fulinta.
3. Sharafta Garsoorka iyo hufnaanta garsoorayaashu waa saldhigga dammaanadda xuquuqda iyo xorriyaadka dadka iyo caddaaladda.

**Qod. 107aad**

**(Xilka Garsoorka)**

1. Garsoorku wuxuu ilaaliyaa nidaamka Dawladda, Dastuurka iyo shuruucda dalka.
2. Wuxuu kafaala-qaadaa, si sharciga waafaqsanna u sugaa xorriyaadka shakhsiga ah iyo xuquuqda muwaaddinka iyo qofka.

**Qod. 108aad**

**(Maxkamadda Sare)**

1. Maxkamadda Sare waa hay'adda ugu sarreya Garsoorka Jamhuuriyadda. Awooddee waxa ay koobaysaa dhulka Dawladda oo dhan xagga dacwooyinka madaniga, ciqaabta maamulka, xisaabaadka iyo dacwad kasta Dastuurka ama shuruucda lagu tilmaamay.
2. Nidaamka dhismaha Maxkamadda Sare sharciga ayaa tilmaamaya.

3. **Sharcigu wuxuu kaloo tilmaamayaa hay'adda iyo maxkamadaha kale ee Garsoor nidaamkooda ku dhismo, noocyadoo.. darajooyinkooda iyo awoodahooda.**

**Qod. 109aad**  
**(Midnimada Garsoorka)**

1. **Garsoorka Jamhuuriyaddu waa mid midayasan**
2. **Lama abuuri karo hay'ado garsoor oo an caadi ahayn iyo kuwo gaar ah.**
3. **Maxkamadaha caadiga ah waxaa laga dhex abuuri karaa qaybo takhasus u leh maaddooyinka gaar ah.**
4. **Dadweynuhu wuxuu si sharciga waafaqsan oo qayb gelaya dacwadaha ciqabeed .. dembiyada culus.**
5. **Sharca ayaa tilmaamaya awooda Maxkamadaha ciidammada waqtiyar nabadda iyo dagaalka. Waqtiga nabada awooddoodu waxay ku kooban tahay dembiyada ay galaan xubnaha ciidammada qalabka sida oo keli ah.**

**Qod. 110aad**  
**(Dommaanadda garsoorayaasha)**

1. **Garsoorayaashu, marka ay xilkooda gudanayaan, waxay u hoggaansamayaan sharciga oo keli ah.**
2. **Garsooraha lama beddeli karo xilkana lagama qaadi karo marka laga reebo xaaladaha sharcigu tilmaamay.**
3. **Shuruudaha, habka magacaabidda, dallacaada, beddelka, shaqo-kafariisinta iyo guud ahaan xaaladda qaanuun ee garsoorayaasha sharciga ayaa tilmaamaya.**
4. **Garsoorayaasha uma bannaana in ay qabtaan meherado, adeegyo ama hawlo ann la socon Karin xilalkooda.**
5. **Go'aannada maamulka iyo anshaxa ee khuseeya Garsoorayaasha, Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa Xeer ku sii saaraya, isagoo dhegeystay soo-jeedinta Wasiirka Garsoorka iyo talada Golaha Sare ee Garsoorka.**
6. **Maxkamadaynta garsoorayaasha ee dembiyada la xiriira gudashada xilalkooda, waxaa idmaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda, isagoo dhegeystay Golaha Sare ee Garsoorka.**
7. **Golaha Sare ee Garsoorku wuxuu u xilsaaran yahay arrimaha hay'adaha garsiirka, waana xubinta u kafaala-qaadda garsoorayaasha madxbannaani-u-gudashada xilkooda. Sharciga ayaa tilmaamaya qaabka dhismaha golaha, awoodihiisa iyo habka shaqadiisa.**

**Qod. 111aad**  
**(Habka dacwad-qaadista)**

1. Doodaha maxkamaduhu, mabda'ahaan oraah, fadhiyadooduna waa furan hihiin oo laga reebo xaaladaha aan caadiga ahayn sharcigu tilmaamay.
2. Go'aan maxkamadeed oo la gaari karaa mar haddii aan dhinacyada oo dhan la siin fursad ku soo bandhigaan dood-celintooda ama Difaacooda.
3. Go'aannada iyo tallaabooyinka maxkamada eek u saabsan xorriyadda shakhsiga ah oo kuwa kaleba waa in la sababeeyaa, waxaanasi sharciga waafaqsan looga qaadan karaa rafcaan.
4. Hay'adaha garsoorku waxay xaq gudashadooda si toos ah u adeegsanaya ciidammada nabadgelyada.
5. Xukunnada maxkamadaha waxaa lagu soo saarayaa magaca Shacbiga Soomaaliyeed.

**Qod. 112aad**  
**(Xeer-Ilaalinta Guud)**

Xeer-Ilaalinta guud waa hay'ad garsoor oo midaysan, sharciga ayaana tilmaamaya awoodaheeda iyo xilalkeeda.

**QAYBTA SHANAAD**  
**DAMMAANADAHA DASTUURIGA**  
**MADAXA KOOWAAD**  
**DATUURNIMADA SHURUUCDA**

**Qod. 113aad**  
**(Saldhigga Awoodda Dawladda)**

1. Sharcigu waa saldhigga awoodda Dawladda.
2. Shuruucda iyo axkaanta leh awood sharci waa in ay waafaqsanaadaan Dastuurka iyo mabaadi'da guud ee Diinta Islaamka.
3. Qaab-dhismeedka hay'adaha Dawladda iyo xiriirka ka dhexeeya Dawladda iyo shakhsiyaadka, kuwa guud iyi kuwa gaar ahba, qaanuunka ayaa nidaaminaya.
4. Go'aannada maamulka ee aan waafaqsanayn sharciga iyo shuruucda iyo axkaanta leh awood sharci ee khilaafsan Dastuurka, waxaa duri kara qofkii dan ka leh, sago u maraya habka sharcigu tilmaamay.

**Qod. 114aad**  
**(Maxkamadda Dastuurka)**

1. Dacwadaha ku saabsan waafaqsanaan la'aanta Dastuurka shuruucda iyo axkaanta leh awood sharci, waxaa go'aan ka garaysa Maxkamadda Sare oo isu beddeleysa Maxkamadda Dastuurka, iyadoo lagu kabayo laba xubnood oo Madaxweynaha Jamhuuriyaddu magacaabo iyo laba xubnood oo Golaha Shacbigu ku soo doorto cod hal-dheeri ah, dhammaantoodna ka baxsan xubnaha Golaha Shacbiga.
2. Habka shaqada Maxkamadda Dastuurka shuruudaha laga rabo xubnaha kaabisha ah iyo muddada xilkooda, sharciga ayaa tilmaamaya.

**Qod. 115aad**  
(Xukunka Maxkamadda Dastuurka)

1. Xukunka Maxkamadda Dastuurka ee lagu go'aamiyey waafaqsanaan la'aanta Dastuurka sharci ama go'aan-leh awood sharci, waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda, Guddoomiyaha Golaha Shacbiga iyo Wasiirka Koowaad, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.
2. Xukunka Maxkamadda Dastuurka eek u tilmaaman farqadda hore, wuxuu leeyahay awood sharci.

**MADAXA LABAAD**  
**MAXKAMADAYNTA MADAXWEYNAHA**  
**IYO XUBNAHA XUKUUMADDA**

**Qod. 116aad**  
(Maxkamadayn)

1. Go'aanka maxkamadaynta Madaxweynaha Jamhuuriyadda iyo Xubnaha Xukuumadda ee Golaha Shacbigu ku oggolaado si waafaqsan Qodobbada 85aad iyo 95aad, waa in uu tilmaamaa fal-dembiyeedka iyo haddii ay jirto, cid dembiga ku wehelisa.
2. Golaha Shacbiga ayaa magacaabaya ha lama saddex xubnood oo Maxkamadda Sare oo isu beddeleysa Maxkamadda Caddaaladda Sare ka hor fuliya xilka dadweyne-u-doodaha.

**Qod. 117aad**  
(Maxkamadda Caddaaladda Sare)

1. Maxkamadda Sare oo isu beddesha Maxkamadda Caddaaladda Sare, waxay garta qaadaysaa iyadoo ay kaabayaan lix xubnood oo qori-tuur Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, fadhi furan, kaga dhex xusho siddeed iyo toban muwaaddin leh shuruudaha xildhibaan lagu noqon karo oo Golaha Shacbigu soo doorto bilowga madal kastoo sharci-dejineed, dhammaantoodna ka baxsan xubnaha Golaha Shacbiga.

2. Qaabka shaqada Maxkamadda sharciga ayaa tilmaamaya.

**MADAXA SADDEXAAD  
WAX-KA-BEDDELKA DASTUURKA**

**Qod. 118aad  
(Wax-ka-beddelid iyo kabiid)**

1. Talo wax-ka-beddel ama kabiid dastuur, waxan soo jeedin kara Madaxweynaha Jamhuuriyadda. Xukuumadda ama saddex meelood meel Xildhibaannada Golaha Shacbiga ama toban kun oo muwaaddin oo leh xaga doorashada.
2. Wax-ka-beddelka iyo kabiidda Dastuurka waxaa go'aaminaya Golaha Shacbiga, waxaana loo qaadayaa laba cod oo ay u dhexcuso ugu yaraan muddo saddex bilood ah. Codka hore wuxuu ku ansaxayaa hal-dheeri Xubnaha Golaha Shacbiga, midka labaadna saddex meelood laba.

**Qod. 119aad  
(Xodka-wax-ka-beddelka)**

Wax-ka-beddelka Dastuurka ee Qodobka hore, ma saamayn karo arrimaha so socda:-

- a) nidaamka Jamhuuriyadnimada ee dalka;-
- b) midnimada dhulka;
- l) xuquuqda iyo xorriyaadka asaasiga ah ee muwaaddinka iyo qofka.

## **AXKAANTA KALA GUURKA AH**

### **I**

#### **Dhaqangal ku meel gaar ah**

**Dastuurkani wuxuu si ku-meel gaar ah, us dhaqangelayaa laga bilaabo 12ka Oktoobar 1990, waxaa loo qaadayaa afti shacbi sannad gudhiisa laga bilaabo taariikhdaas, haddii ay duruuftu oggolaato.**

**Aftida waxaa ka kayb gelaya doortayaasha oo idil. Doorte kasta waxuu xaq u leeyahay in uu oggolaado ama diido Dastuurka, isagoo dhibanaya cod madax-bannaan, sir, toos iyo shakhsi ah, loona siman yahay, si wafaqsan sharciga aftida.**

**Ansaxinta aftida waxaa leh Maxkamadda Sare, waxayna go'aankeeda ku dhawaafaysaa 30 maalmood gudhood oo ka bilaabata maalinta cod-bixintu xiranto, Muddadaas gudaheeda Maxkamadda Sare, waxay kaloo go'aan kama dambeys ah ka garaysaa dacwadaha afti-qaadidda la xiriira. Go'aanka anxsaxinta waxaa lagu sheegayaa natiijada aftida.**

**Haddi ansaxinta aftida dhici weydo, waxaa la qaadayaa afti cusub, saddex bilood gudahood, laga bilaabo tarriikhda go'aanka Maxkamadda Sare.**

### **II**

#### **Natiijada aftida**

**Natiijada aftida la qaaday haddii ay noqoto in Shacbigu diiday Dastuurka, Golaha Shacbigu wuxuu ku hawlgelayaa dejinta dastuur cusub oo isna loo qaadaya afti, lix bilood gudahood laga bilaabo maalinta ku-dhawaaqidda natiijada.**

**Ilaa iyo inta Golaha Shacbigu ka guddoonsanayo dastuura cusub, waxaa sii soconaya ku-dhanqanka ku-meel-gaarka ah ee Dastuurka.**

**Nitiijada aftidu haddi ay noqoto oggolasho, Dastuurku waxuu qaadanaayaa dabecad joogto ah.**

### **III**

#### **Doorashada Golayasha Cusub**

**Doorashooyinka Golaha Shacbiga iyo Golyaasha Degaannada ee cusub waxay qabsoomayaan muddo sannad gudahee ah, laga bilaabo dhaqan-galka Dastuurkan, haddii ay duruufu oggolaato.**



**Ilaa iyo inta laga dooranayo Golaha Shacbiga cusub, xilka sharci-dejinta dalka waxaa sii haynaya Golaha Shacbiga ee hadda jiro oo ku shaqaynaya hab buuxa. Sidaas oo kale Golayaasha Degaannada.**

**Guddi Joogtada ah ee Golaha Shacbigu wuxuu isu beddelayaa Xafiiska Guddoonka Golaha Shacbiga.**

#### **IV**

##### **Madaxweynaha hadda xilka haya**

**Muddada Madaxweynaha hadda xilka haya waxay dhammaanaysaa toddoba sama marka ay ka soo wareegto maalintii la dhaariyey.**

**Xaddidaadda tirade dib-u-doorashada eek u tilmaaman qodobka 80aad, waxay saamaynaysa Madaxweynaha la doorto dhaqan-galka Dastuurka kaddib.**

#### **V**

##### **Faafinta Dastuurka**

- 1. Si muwaaddin kasta xog-ogaal ugu noqdo nuxurka Dastuurka qodobbada Dastuurka waxaa lagu faafinayaa qalabka warbaahinta ee Dawladda.**
- 2. Dastuurka waxaa lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.**
- 3. Dhammaan hay'adaha Dawladda, muwaaddiniinta iyo qof kasta oo kale oo ku hoos nool awoodda Jamhuuriyadda, waxaa waajib ku ah in uu si daacad ah u dhowro Dastuurka oo ah saldhigga shuruucda Dawladda Soomaaliyeed.**

**Muqdisho, 12/10/1990**

**Madaxweynaha JDS  
(Maxamed Siyaad Barre)**

**Wasiirka Kowwaa  
(Maxamed Xawaadle Madar)**

**Ku-xigeenka Wasiirka 1aad  
Wasiirka Arrimaha Gudaha  
(Cabdiqaasim Salaad Xasan)**

**Wasiirka Garsoorka & A. Diinta  
(Cabdullaahi Cosoble Siyaad)**

**TUSMO  
DATUURKA JAMHUURIYADDA DIMOQRAADDIGA  
SOOMAALIYA**

**QAYBA KOOWAAD  
MABAADI' GUUD**

**MADAHA KOOWAAD  
NIDAAMKA DAWLADDA**

<b>Qod. 1aad</b>	<b>Jamhuuriyadda</b>
<b>Qod. 2aad</b>	<b>Calanka, astaanta iyo magaalo-madaxda</b>
<b>Qod. 3aad</b>	<b>Diinta</b>
<b>Qod. 4aad</b>	<b>Afafka Rasmiga</b>
<b>Qod. 5aad</b>	<b>Shacbiga</b>
<b>Qod. 6aad</b>	<b>Dhulka Dawladda</b>
<b>Qod. 7aad</b>	<b>Sinnaanta muwaaddiniinta</b>
<b>Qod. 8aad</b>	<b>Jiritanka axsaad badan</b>

**MADAXA LABAAD  
SALDHIGGA SIYAASADDA DIBADDA**

<b>Qod. 9aad</b>	<b>Mabda'a aaya-ka-talinta</b>
<b>Qod. 10aad</b>	<b>Midowga dalaka soomaaliyeed</b>
<b>Qod. 11aad</b>	<b>Siyaasadda dhexdhexaadka iyo nadab-ku-wada Noolaanshada</b>
<b>Qod. 12aad</b>	<b>Siyaasadda wah wada dabsiga</b>
<b>Qod. 13aad</b>	<b>Jamhuuriyadda iyo xiriirka calamiga</b>
<b>Qod. 14aad</b>	<b>Xuquuqda aadanaha</b>

**QAYBTA LABAAD  
XUQUUQDA, XORRIYAADKA IYO WAAJIBAADKA  
ASAASIGA AH EE MUWAADDINKA IYO QOFKA**

**MADAXA KOOWAAD  
XUQUUQDA ASAASIGA EE MUWAADDINKA**

<b>Qod. 15aad</b>	<b>Xaqa doorashada</b>
<b>Qod. 16aad</b>	<b>Xaqa gelidda shaqada dawladda</b>
<b>Qod. 17aad</b>	<b>Xaqa degidda iyo socodka</b>
<b>Qod. 18aad</b>	<b>Xaqa abuuridda axsaab siyaasiah</b>
<b>Qod. 19aad</b>	<b>Xaqa abuuridda ururro shaqaale</b>
<b>Qod. 20aad</b>	<b>Xaqa shaqo joojinta</b>
<b>Qod. 21aad</b>	<b>Xaqa abuuridda ururro bulsho</b>
<b>Qod. 22aad</b>	<b>Xorriyadda bannaan baxa iyo ra'yiga</b>
<b>Qod. 23aad</b>	<b>Xorriyadda saxaafadda</b>

**MADAXA LAABAAD  
XUQUUDA ASAASIGA EE QOFKA**

<b>Qod. 24aad</b>	<b>Xaqa nolosha iyo nabadgelyada qofka</b>
<b>Qod. 25aad</b>	<b>Xorriyadda qofnimo</b>
<b>Qod. 26aad</b>	<b>Nabadgelyada qofka xorriyadda shakhsiga Ah laga qaado</b>
<b>Qod. 27aad</b>	<b>Lahaanshaha gaar ahaaneed</b>
<b>Qod. 28aad</b>	<b>Xurmada hoyga</b>
<b>Qod. 29aad</b>	<b>Xorriyadda isgaarsiinta</b>
<b>Qod. 30aad</b>	<b>Xorriyadda diinta</b>
<b>Qod. 31aad</b>	<b>Xaqa dacwadda iyo is difaaca</b>
<b>Qod. 32aad</b>	<b>Ka cabashada go'aannada maamulka iyo Xaqa mag-dhowga</b>
<b>Qod. 33aad</b>	<b>Masuuliyadda ciqaabta</b>
<b>Qod. 34aad</b>	<b>Dib u noqosho la'aanta sharciga ciqaabta</b>
<b>Qod. 35aad</b>	<b>Isu-celinta eedeysanaha ama dembilaha</b>

**MADAXA SADDEXAAD  
WAJIBAADKA MUWAADDINKA IYO QOFKA**

<b>Qod. 36aad</b>	<b>Ilaalinta hantida guud</b>
<b>Qod. 37aad</b>	<b>Difaaca dalka</b>
<b>Qod. 38aad</b>	<b>Waajibka canshuur bixinta</b>
<b>Qod. 39aad</b>	<b>Dhawrista Dastuurka iyo shuruucda</b>

**QAYTA SADDEXAAD  
SALDHIGGA DHAQAN-DHAQAALAH**

**MADAXA KOOWAAD  
DHAQAALAH**

<b>Qod. 40aad</b>	<b>Horumarinta dhaqaalaha</b>
<b>Qod. 41aad</b>	<b>Lahaanshaha kheyraadka dabiiciga</b>

**Qod. 42aad** Iskaashiga dadweynaha  
**Qod. 43aad** Hal abuurka-dhaqaale  
**Qod. 44aad** Maal-gelinta dibadda

**MADAXA LABAAD  
HORUMARINTA WAXABARASHADA, CILMIGA  
IYO SUUGAANTA**

**Qod. 45aad** Waxbarashada  
**Qod. 46aad** Waxbarashada asaasiga ah iyo akhris-qoris  
La'aant  
**Qod. 47aad** Horumarinta cilmiga iyo suugaanta  
**Qod. 48aad** Dhallinyarada iyo isboortiga

**MADAXA SADDEXAAD  
DHAQANKA IYO DARYEELKA BULSHADA**

**Qod. 49aad** Horumarinta hiddaha iyo dhaqanka  
**Qod. 50aad** Horumarinta miyiga  
**Qod. 51aad** Caafimaadka  
**Qod. 52aad** Daryeelka qoyska  
**Qod. 53aad** Xannaanada dadka taagta yar  
**Qod. 54aad** Haweenka  
**Qod. 55aad** Shaqada iyo shaqaalaha  
**Qod. 56aad** Taakulaynta iyo bedbaadinta bulshada

**QAYTA AFARAAD  
QABKA DHISMAHA DAWLADDA**

**MADAXA KOOWAAD  
GOLAHA SHACBIGA**

**XUBINTA KOOWAAD  
NIDAAMKA GOLAHA SHACBIGA**

**Qod. 57aad** Awoodda sharci-dejinta  
**Qod. 58aad** Doorashada Golaha Shacbiga  
**Qod. 59aad** Muddada xilka  
**Qod. 60aad** Kala diridda Golaha Shacbiga  
**Qod. 61aad** Kalladhiyada \*\*\*\*\*  
**Qod. 62aad** Fadhiyada iyo go'aannada Golaha  
**Qod. 63aad** Ka gayb galka xubnaha Xukuumadda  
**Qod. 64aad** Xeerhoosaadka

<b>Qod. 65aad</b>	<b>Awoodda Golaha</b>
<b>Qod. 66aad</b>	<b>Xildhibaanka</b>
<b>Qod. 67aad</b>	<b>Duridda xildhibaannimada</b>

**XUBINTA LABAAD**  
**QAYBTA SHARCI-DEJINTA IYO AWOODO KALE EE GOLAHA**

<b>Qod. 68aad</b>	<b>Mashruuc sharci</b>
<b>Qod. 69aad</b>	<b>Soo saaridda iyo faafinta sharciga</b>
<b>Qod. 70aad</b>	<b>Xil-saarasho sharci dejin</b>
<b>Qod. 71aad</b>	<b>Xeer-sharci</b>
<b>Qod.72aad</b>	<b>Cafiska guud iyo cafiska gaar ahaaneed</b>
<b>Qod. 73aad</b>	<b>Misaaniyadaha</b>
<b>Qod. 74aad</b>	<b>Canshuuraha</b>
<b>Qod. 75aad</b>	<b>Xaaladda dagaalka</b>
<b>Qod. 76aad</b>	<b>Kormeerika Golaha</b>

**MADAXA LABAAD**  
**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

<b>Qod. 77aad</b>	<b>Madaxa Dawladda</b>
<b>Qod. 78aad</b>	<b>Shuruudaha doorashada</b>
<b>Qod. 79aad</b>	<b>Habka doorashada</b>
<b>Qod. 80aad</b>	<b>Muddada xilka iyo dhaarta</b>
<b>Qod. 81aad</b>	<b>Gunnada</b>
<b>Qod. 82aad</b>	<b>Xil gudasho kanrid la'aan</b>
<b>Qod. 83aad</b>	<b>Awoodaha iyo xilalka Madaxweynaha</b>
<b>Qod. 84aad</b>	<b>Awwodda aan caadiga ahayn ee Madaxweynaha</b>
<b>Qod. 85aad</b>	<b>Masuuliyada</b>

**MADAXA SADDEXAAD**  
**XUKUUMADDA**

**XUBINTA KOOWAAD**  
**NIDAAMKA XUKUUMADDA**

<b>Qod. 86aad</b>	<b>Awoodda fulinta</b>
<b>Qod. 87aad</b>	<b>Dhismaha xukuumadda</b>
<b>Qod. 88aad</b>	<b>Wasiir-ku-xigeenno</b>
<b>Qod. 89aad</b>	<b>Shuruudaha xibinnimad Xukuumadda</b>

**Qod. 90aad                   Dhaarta**  
**Qod. 91aad                   Kalsoonida Golaha Shacbiga**

**XUBINTA LABAAD**  
**HAWLAHA XUKUUMADDA IYO HAY'ADAHA RAACSAN**

**Qod. 92aad                   Xilka Golaha Wassirrada**  
**Qod. 93aad                   Xilka Wasiiraka Koowaad**  
**Qod. 94aad                   Nidaamka Xuruumadda**  
**Qod. 95aad                   Masuuliyadda ciqaabeed ee Wasiirada**  
**Qod. 96aad                   Awoodda xeer nidaaminta**  
**Qod. 97aad                   Hawl wadeennada iyo Shaqaalaha Dawladda**  
**Qod. 98aad                   Guddiga Shaqada Dawladda**

**XUBINTA SADDEXAAD**  
**CIIDAMMADA QALABKA SIDA IYO GUDDIGA**  
**DIFAACA QARANKA**

**Qod. 99aad                   Cidammada Qalabka Sida**  
**Qod. 100aad                  Guddiga Difaaca Qaranka**

**XUBINTA AFARAAD**  
**BAAHINTA AWOODDA MAAMULKA DALKA**

**Qod. 101aad                  Fidinta Maamulka**  
**Qod. 102aad                  Awoodda hay'adaha degaannada**  
**Qod. 103aad                  Golayaasha degaanka**

**XUBINTA SHANAAD**  
**HAY'ADAHA KALKAALINTA**

**Qod. 104aad                  Hantodhowrka Guud**  
**Qod. 105aad                  Golaha Qaranka ee dhaqaalaha iyo shaqada**

**MADAXA AFARAAD**  
**GARSOORKA**

**Qod. 106aad                  Awoodda iyo madax-bannaanida Garsoorka**  
**Qod. 107aad                  Xilka Garsoorka**  
**Qod. 108aad                  Maxkammadda Sare**  
**Qod. 109aad                  Midnimada Garsoorka**  
**Qod. 110aad                  Dammaanadda garsoorayasha**  
**Qod. 111aad                  Habka dacwad qaadista**  
**Qod. 112aad                  Xeer liaalinta Guud**

**QAYTA SHANAAD  
DAMMAANADAHA DASTUURIGA**

**MADAXA KOOWAAD  
DASTUURNIMADA SHURUUCDA**

**Qod. 113aad**                    **Saldigga awoodda Dawladda**  
**Qod. 114aad**                    **Maxkamadda Dastuurka**  
**Qod. 115aad**                    **Xukunka Maxkamadda Dastuurka**

**MADAXA LABAAD  
MAXKAMADEYNTA MADAXWEYNAHA IYO  
XUBNAHA XUKUUMADDA**

**Qod. 116aad**                    **Maxkamadayn**  
**Qod. 117aad**                    **Maxkamadda Caddaaladda Sare**

**MADAXA SADDEXAAD  
TACDIILKA DASTUURKA**

**Qod. 118aad**                    **Wax ka beddelid iyo kabiid**  
**Qod. 119aad**                    **Xadka wax ka beddelka**

**AXKAANTA KALA GUURKA AH**

**- I**                                    **Dhaqangal ku meel gaar ah**  
**- II**                                   **Natiijada aftida**  
**-III**                                **Doorashada golayaasha cusub**  
**- IV**                                **Madaxweynaha hadda xilka haya**  
**- V**                                **Faafinta Dastuurka**